

JAMHURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA

Xafiiska Nootaayada iyo Adeegyada
Sharciga ee Talasan



مكتب تلسن للكتاب العدل والخدمات
القانونية

Talasan Public Notary and Legal Services

Ref :TPNLS1837/2026

Tr.15/03/2026



BUSHRA BUSINESS GROUP

(MEMORANDUM OF ASSOCIATION)

SHARCIGA SHIRKADDA

BUSHRA BUSINESS GROUP

(DASTUURKA SHIRKADDA)

MOGDISHU – SOMALIA

2026

Address: Abdulaziz District- Mogadishu-Somalia
Tel:00252612211228, 00252612848484, E-mail: talasanpublicnotary@gmail.com

JAMHURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA

Xafiiska Nootaayada iyo Adeegyada
Sharciga ee Talasan



مكتب تلسن للكتاب العدل والخدمات
القانونية

Talasan Public Notary and Legal Services



Ref :TPNLS1837/2026

Tr.15/03/2026

UJEEDDO: HESHIIS DHISMO SHIRKAD GAAR LOO LEEYAHAY LAGUNA MAGACAABO (BUSHRA BUSINESS GROUP)

Maanta oo ay taariikhdu tahay **15/03/2026** Aniga oo ah Dr. Cali Xasan Cali lehna Nootaayada Talasan ee kutaala Degmada C/casiis Agagaarka Saldhigga Bari ee Ajabka Oryantaale, waxaa Xafiiskayga iiguyimid Asaasaha Shirkadda **Mohamed Dhiesow Hassan** ina Madino Nur Mohamud Ku dhashay Afgoye Sanadkii 09/Jun/1978 Lehna Aqoonsi Passport No. P01150477, Degan Xamar, oo ah Milkiilaha Shirkadda **BUSHRA BUSINESS GROUP**, Asaasaha Shirkadda waxa uu iga codsatay in aan u qoro Xeerka Asaasidda Shirkadda **BUSHRA BUSINESS GROUP** oo kashaqaysa: **Animal Skin Trading, Petroleum Satiation & Car Washing Services, Construction Services and Import & Export Services**. Asaasaha Shirkadda oo ka maarmay kaalmo Marqaatiyeed Aniguna aan ku waafaqay ayadoo Shirkaddu yeelanayso Xeer-Hoosaadyo iyo Nidaam ay ku dhaqanto waxayna kala yihiin:

QODOBKA 1-AAD

MAGACA SHIRKADDA

Magaca Shirkadda waa (**BUSHRA BUSINESS GROUP**)

QODOBKA 2-AAD

ASTAANTA SHIRKADDA

Astaanta Shirkadda waa  **BUSHRA BUSINESS GROUP**

Magaca iyo Astaanta shirkadda waxa ay gaar u tahay Asaasaha Shirkadda **Mohamed Dhiesow Hassan**.

QODOBKA 3-AAD

WAQTIGA LA ASAASAY SHIRKADDA

Shirkadda **BUSHRA BUSINESS GROUP** waxaa la aasaasay 2020

QODOBKA 4-AAD

XARUNTA SHIRKADDA

Shirkadda Xarunteeda wayn waxa ay kutaalaa Magaalada Mogadishu waxa ayna xaruma ka furan kartaa dhamaan Gobolada iyo Degmooyinkooda dalka.

QODOBKA 5AAD

MUDDADA JIRITAANKA SHIRKADDA

Shirkadda lagu magacaabo **BUSHRA BUSINESS GROUP** waxay jireysaa muddo **100 sano** ah oo ka billaabaneysa maalinta laga diiwaan geliyo Hay'addaha ku shaqada leh, waana la kordhin karaa Mudadaas hadii uu ogolaado Milkiilaha/Asaasaha Shirkadda.

QODOBKA 6-aad

UJEEDOOYINKA SHIRKADDA

Shirkadda waxa ay hiigsanaysaa Ujeedooyinka Soosocda:-

1. In ay ka Qeyb qaadata Hormarinta Dalka.
2. In ay daboosho Dhamaan Baahiyaha Ganacsi ee **Animal Skin Trading, Petroleum Satiation & Car Washing Services, Construction Services and Import & Export Services.**
3. In ay Bulshada Soomaliyeed u abuurto Shaqo.

QODOBKA 7-aad

RASUMAALKA SHIRKADDA

Rasumaalka Shirkadda Lagu Asaasay waa **\$3,000,000 (Sedax Malyan oo Dollars)** waxaana leh Mudanaha lagu Magacaabo **Mohamed Dhiesow Hassan** oo kaliya, Asaga ayaana awood u leh in uu ku soo daro qofkii uu u garto in ay saami kudarsato, Asaga oo u samaynaya warqad caddeyneysa saamiga uu ku darsaday Shirkadda. Asaasaha waxa uu u leeyihay Saamiyada Sida Shaxdaan hoose kucad:-

S/ N	Magaca	Jagada	Saamiga	Qiimaha	Wadarta Saamiga	Boqolkiba
1.	Mohamed Dhiesow Hassan	Gudomiye/Asaase	3000	\$1000.00	\$3,000,000	100%
2.	Total		3000		\$3,000,000	100%



QODOBKA 8-AAD

SAAMIYADDA SHIRKADDA

Saamiyada Shirkaddu waxa uu ka kooban yihiin **3000** Saami oo Magacaaban

1. Saami kasta oo gaara 5% Ra'sumaalka Shirkadda waxuu leeyahay Hal Cod
2. Hantida Shirkadda waa lakordhin karaa hadii uu Ogolaado Asaasaha Shirkadda.
3. Shirkadda waxaa lagu soo geli karaa **(10)** Toban Saami oo halkii saami Qiimihiisu yahay \$1000.00 (Kun Dollar Kaliya).

QODOBKA 9-AAD

TIRADA ASAASAYAASHA

Shirkadda **BUSHRA BUSINESS GROUP** waxaa Asaasay oo leh Mudanaha lagu Magacaabo **Mohamed Dhiesow Hassan** oo ah Asaasaha Shirkadda asaga ayaana leh go'aamada kama dambaynta ah ee shirkadda.

QODOBKA 10-AAD

QAAB DHISMEEDKA SHIRKADDA

Shirkadda Lagu Magacaabo **BUSHRA BUSINESS GROUP** waxa uu u dhisan yahay Qaab dhismeedka Shirkadda Sida Hoos ku Cad:

1. Gudoomiye.
2. Shaqaale Kahoos Shaqeeya.

QODOBKA 11-AAD

WAAJIBAADKA GUDDOOMIYAHA SHIRKADDA

Wajibaadka Guddoomiyaha Shirkadda ahna Asaasaha Shirkadda (Chairman)

1. In uu leeyahay Go'aamada Masiiriga ah ee Shirkadda Cid lawadaagi kartana aysan Jirin.
2. In uu Shir Guddomiyo Shirarka Guddiga Maamulka.
3. In uu Shirkadda kumatalo Hay'adaha Dowladda iyo Shirkaddaha gaarka looleeyahay.
4. In uu yeeshaa kormeeridda iyo habsami usocodka howlaha Shirkadda.
5. In uu yeeshaa Hubinta Go'aamada Guddiga Maamulka.
6. In uu yahay Qofka ugu dambeeya ee iska leh Go'aamada Shirkadda.



QODOBKA 12-AAD

SAXIXA LADHIGAAYO BANKIGA

1. Akoonada Shirkadda waxaa saxiixaayo Gudoomiyaha ahna Asaasaha Shirkadda.
2. Gudoomiyaha Shirkadda ayaa Go'aan ku gaaraya Saxiixyada Jeegaga, Asaga ayaana Ciddii uu Doona u wakiilan karo Saxiixa Lacag Saaridda Bankiyada, Asaga ayaana Badali karo saxiixyada Jeegaga, Asaga oo Ogaysiinaayo Cidda kushaqada leh.



QODOBKA 13-AAD

SHAQSIYADDA QAANUUNEED EE SHIRKADDA

Shirkaddu waxay leedahay xuquuq qaanuuni ah, hadaba magaca Shirkadda ayaa loo isticmaalayaa dhammaan hantida Shirkadda sida: - Bank Account, Tiimbarada, Qalabka, Gaadiidka, Guryaha, Lacag Bixinta, Lacag Qabashada, Magaca iyo Hal ku dhiggooda.

QODOBKA 14-AAD

SHARCIGA IYO LUQADDA HESHIISKA

- 1) Luqada heshiiska uu ku qoran yahay waxaa asal u ah luqadda Soomaaliga
- 2) Marjaca loo noqonayo waa dastuurka Shirkadda iyo Shareecada Islaamka
- 3) Wixii fasiraad ah waxaa lala kaashanayaa dadka xirfaddoodu tahay howshan
- 4) Nuqulka Af-soomaaliga oo uu saxiixay milkiilaha Shirkadda, waxaa lagu keydinayaa xafiiska xarunta Shirkadda iyo goobihii uu tilmaamay xeerka iyo shuruucda u degsan dalka ee Shirkadaha Soomaaliyeed.

QODOBKA 15-AAD

WIXII AAN HALKAAN KU CADDAYN

Wixii aan halkaan ku caddayn ee loo arko in ay laga maarmaan u yihiin howlaha waxaa loo raacayaa sida uu qabo xeerka Shirkadaha iyo shareecada Islaamka.

QODOBKA 16-AAD

DHAQAN GALKA SHARCIGA DHISMAHA

Sharciga dhismaha Shirkadda wuxuu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Asaasaha Shirkadda, isla markaana uu Saxiixo Nootaayaha, Lagana diiwaan geliyo Hay'addaha ku shaqada leh.

QODOBKA 17-AAD

TIRIDDA BOGAGGA EE HESHIISKU KU QORANYAHAY

Heshiiskaan wuxuu ku qoran yahay Af-soomaali wuxuuna ka kooban yahay **Toban iyo Todoba Qodob iyo Shan bog iyo Cover Page**. Heshiiskaan waxaa saxiixay Asaasaha magaciisa hoos ku xusan yahay kadib markii aan u Aqriyay uuna Fahmay Qoraalkaan raalina uu ka noqday sida uu u qoranyahay heshiiskaan, waana kan saxiixiisa hoos ku qoran:-

S/N	Magaca	Saxiixa
1.	Mohamed Dhiesow Hassan	

SUGITAANKA NOOTAAYAHA

Aniga oo ah Dr. Cali Xasan Cali lehna Nootaayada Talasan ee kutaala Degmada C/casiis Agagaarka Saldhigga Bari ee Ajabka Oryantaale, waxa aan caddaynayaa in Saxiixa sare ku xusan uu yahay Midkii saxda ahaa ee Asaasaha Shirkadda **BUSHRA BUSINESS GROUP**, laguna saxiixay Xeerkaan Nootaayaha Hortiisa Asaga oo Raali ah, Caafimaad qaba, Cidna aysan Qasbin, sidaas daraadeed Xeerkaan waa mid ansax ah oo waafaqsan Shareecada Islaamka iyo Qaanuunka Dalka u degsan waxaana lagu qoray Diiwaanka Nootaayada.

Nootaayaha

Dr. Cali Xasan Cali



[illegible]



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTIONAL AFFAIRS

NOTARY DOCUMENT VERIFIED CERTIFICATE

Shahaado Caddeyn dukumeenti Nootaayo

Diwaanka Wasaaradda: MOJ18340

DATE: 15-03-2026

Magaca Nootaayada:	Talasan
Dr.ka Nootaayada:	Cali Xasan Cali Nuur
Nuuga Adeega:	Xeer
Maamulka:	Gobolka Banaadir
Degamada:	Cabdicasiis
Ref Nootaayada:	TPNLS/1837/2026
Shahaadadaan waxay cadeyneysaa saxahaanshaha nootaayada saxiixeeda iyo tiimbarahaheeda iyo habraaca dokumintiga in uu sax yahay.	This certificate certifies the authenticity of the notary's signature and stamp and the process of the document



Director of Judiciary Affairs Department,
Ministry of justice and constitutional Affairs.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA

WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAHA



جمهورية الصومال الفيدرالية

وزارة التجارة والصناعة

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

MINISTRY OF COMMERCE AND INDUSTRY

To

The Director(s)

BUSHRA BUSINESS GROUP

Banaadir, Banaadir, Hodan

THE COMPANIES LAW, 2019

Records relating to the below company held by the Companies Registry as at 17-03-2026

COMPANY	BUSHRA BUSINESS GROUP
COMPANY NUMBER	15458841635
NOMINAL SHARE CAPITAL	3000000
NUMBER AND TYPE OF SHARES(VALUE PER SHARE)	100 Ordinary shares @ 30000 each
DATE OF REGISTRATION	17/03/2026
POSTAL ADDRESS	Banaadir, Banaadir, Hodan

Name of Directors and Shareholders of the above company with their particulars are as follows

NAME	DESCRIPTION	ADDRESS	NATIONALITY	SHARES
Mohamed Dhiesow Hassan	Director Shareholder	ABDIAZIZ, MOGADISHU	Somalia	Ordinary: 100
TOTAL				100

